SOOMAALI/SOMALISKA

Mirena®
levonorgestrel 20 µg/24 tim

Mirena waa daawo loo isticmaalo markaad iska ilaalineysid in aad uur yeelatid oo la shaqeyneyso korka, hormun, waxaana la geliyaa ilmagaleenka. Waxeey u sameysan tahay sida ”T” oo kale, waxeeyna ka sameysan tahay nalastiko. Waxaa sida T:da loogu sameeyay in eey ku haboonaato ilmagaleenka, dhinaceeda bidixeedna waxaa kaga rakiban kabsel oo bixinaayo hormun. Nooca balastikada eey ka sameysantahay korkeeda waa polyetylen, waxaana ka laalaaddo labo dun.

*Daawada ka soo baxeyso kapsalka waa: Levonorgestrel 52 mg. Waxaa kalo ku jiro: polydimetylsiloxan.*

Levonorgestrel waa hormunka hurudda korka oo ku jiro daawooyinka ilmaha leyskaga ilaaliyo. Wuxuu ku sii deynaya ilmagaleenka tiro go´an oo hormunkas ah, 20 mikrogram/xilligii (24-saac) oogu yaraan muddo 5 sano ah.

Mirena in eey tahay daawo aad ammaan ku tahay waxaa tilmaamaya wax yaalo badan oo ka mid ah:

- Hormuunka hurudda korka levonorgestrel, ayaa ka soo baxayo kapselka Mirena taaso keeneyso in ilmagaleenka qoloftiisa qoyan in eey gasho nasasho.
- Waxaa ku dhacaaya argagax gudaha ah oo caadi u ah ilmagaleenka qoloftiisa qoyan markii wax la geliyo.
- Dhacaanka ka imaaanayo minka dhuuntiisa wuu isbadala wuxuuna ku adkeeynaya in biyaha ragga eey maraan.
- Ukunta markeey dillaaceyso waxaa ku dhici karo isbadal laakin aan weyneen. Isbadalkaas wax badan wax u dhimaya maaha hormunka qayaastiisa ee korka.

**Waxa lagu garto**

Tusmada, awooda bacriminta liid ku ah, cisada badan aanan caadi ahayn, laysaga badbaadiyo korniinka xub-axaaleedka, dumarka lagu daaweeyo hormuunka “oestrogen” xilliga awooda bacriminta ay hoos u dhacdo.

**Ha isticmaalin**

Mirena yaa loo gelin qofka haddii infekshan hoosta kaga jiro, cudur minka ka qabo, caadada qofka loo gelinaayo sida eey oogu dhacdo aan la baarin, minka uu caadi ahayn, cudur xun beerka ka qabo ama buro beerka ku leeyahay, qabo cudurka dhiigga burtuqyo sameeysanaayo, tromboflebit.

**Ogoow**

Waxaa muhiin ah, intaan loo gelin Mirena, in la hubsado in uu qofka uur ama infekshan hoosta kaga jirin.

**Iska soo tuuris**

Mirena ilmagaleenka wuu iska soo tuuri kara adigoo mooddid in uu weli kuugu jiro. Haddii Mirena kulligeed ama qaar uu minka iska soo tuuro waxaa lagu garanaaya caado fara badan ayaa qofka ka imaaneeyso. Haddii saas eey Adiga kuugu dhacdo si deg deg ah oola xiriir dhaqtarkaaga ama umuliso. Kuuguma jiro wax kaa ilaalinaayo uur in aad yeelatid.

**Gudbid**

Marrar aad loola yaabo ayaa waxaa dhacday in markii qofka loo gelinaayo in minka giddaradiisa eey saas dhacdo deg deg waa in Mirena loo soo bixiya.



*Ilmagaleenka markuu Mirena ku jirin.*



*Ilmagaleenka markuu Mirena ku jiro.*

**Kaadi sokoroow**

Inkastoo daawada Mirena ka soo baxeeyso eey aad u yartahay hadana waxeey wax u dhimi karta sokorta korka ku jirto qayasteeda. Haddii kaadi sokoroow aad qabtid waa in sokorta korkaada ku jirto markasta lala socda.

**Isbadalka caadada ku dhaceyso**

Haddii aad isticmaashid Mirena caadadaada sidii eey kuugu dhici jirtey weey iska badaleeysa. Saddexda bilood oo u horeeysa waxaa u caadi ah in dhiig dareer kuugu dhaco. Badanaa waxaa kaa imaanayo dhiig yar laakin weey dhacdaa in caado fara badan in eey kaa timaado.

Dummarka oo sidoodaba ku qabay dhib caadada badan oo ka socon jirtay baddankood waxaa ku dhici karta 4–6 biloodda u horeeysa in taas u wehliso in dhiig yar yar ka socdo maalmo badan.

Waxaa dhici karto maadaama hormuunka oow ku fidaayo ilmagaleenka qoloftiisa qoyan in uu nasto, taaso keeneyso in caadada yaraato waxeeyna u keeni kartaa dummar qaarkood in caadada dhan eey ka tagto. Inkastoo aan caado ku dhaceyn dummarkas hadana minkooda iyo korka qayaasta hormunkiisa waxeey u shaqeynayaan caadi.

Haddii caado eey kuugu dhicin 6–8 usbuuc waxaa haboon in aad la xiriirta Xarunta Dummarka lagala taliyo isticmaalka uur celinta si lagaaga baaro uur. Ha kuugu jirto Mirena haddii jawaabta lagu siiyo eey noqoto in uur aadan laheyn oona shaki kale kuugu jirin.

Haddii caadadaada 3–6 bilood da u horeeysa kaddib eey badan tahay oona si lama filaan ah kuugu dhaceeyso la xiriir u baahan tahay daawo kale oo kaa ilaalisa uurka iyo loo baaro in eey jirin sababo kale oo keenay dhibaatadaan.

**Uurka**

Si aad uur u yeelatid markeey Mirena kuugu jirto weey adagtahay. Haddii aad uur yeelatid isla marki la xiriir dhaqtarkaaga ama umuliso. (Maadaama eey macduun tahay in qof Mirena oogu jirto in uu uur yeesho dhaawac hormun gaarsiiya dhiciska lama maqal).

**Markaad nuujineeysid**

Mirena weey raacda caanaha naaska laakin waa wax aad u yar oo lagama yaabo in ilmaha aad naaska siineysid in eey wax u dhinto.

**Sida caadada isu badaleeyso**



**Daawooyin kale**
Waa in aad u sheegta dhaqtarkaada/umulisada nooca daawooyinka aad qaadatid maalinkasta. Daawooyinka qaarkood waxaad ka heleeysid Mirena wax ayeey u dhimaayaan.

**Dabagalka**
Si loo daba galo daawada waxaa caadi u ah in baaritaan laguugu yeero saddex bilood kaddib markii laguu geliyo.

Inta jeer oo aad baaritaan u baahan tahay waxaad kala tashataa dhaqtarkaada/umulisada.

**Isticmaalka**
Mirena waxaa isticmaali kara dummarka badankood oo raba si raaxo leh in eey iskaga celiyaan in eey uur ayna dooneen in eey yeeshaan.

Waxaa loo geliyaa naagta ilmagaleenka todobba maalmood gudaheed markeey caadada ku dhacdo. Haddii aad rabtid inaad ku baddalatid Mirena ama aad rabtid in aad iska beddeshid waxaa laguu gelin kara inta maalmod aad caadada qabtid oo dhan. Mirena waxaa leyska baddala shan sano kaddib.

Markii laguu geliyo ilmagaleenka Mirena islamarkii waxeey kaa ilaalineeysa in uur aad yeelatid.

Mirena waad iska bixin kartaa markaad rabtid. Laakin waxaad ogaata in markaad iska bixisid oodan ku beddelin daawo kale oo uurka kaa ilaaliso in aad uur yeelan kartid.

**Waxa kaa soo gaari kara**
Waxa kaa soo gaari kara Mirena waa wax fudud oo dhaqso kaa baaba´ayo.

*Badanaa:* Caadada oo si qalafsan oogu dhacda 30 % ayaa la sheegay. Qalafsanaantaas oo ah in dhiig yar ka dareeray. Muddo 3–6 bilood ka dib wuu ka istaaga dhiig dareerka. Dummar 10–20 % islamarkii ayuu ka istaagey dhiig dareerka. Dhibaatada kale oo kaa soo gaari karta waxaa u sabbab ah hormunka. Taaso eey ka mid yihiin madax xanuun, finan, naasaha oo ku kara, madluun in aad noqotid, miisaankaaga oo isbadala, labbalabbo, dhacaan iyo hoosta oo ku xanuunta iyo dhabbar xanuun.

## Dhiigga waqtigiisa sida aad oola socotid

Halkaan maalinkasta ku qor haddii uu dhiig kaa yimaado. Calaamadda "**X**" maalmaha aad u baahan tahay inaad dhiiggas suuf ka gashatid iyo calaamadda "**S**" ku qor maalmaha dhibco dhiig ah kaa socdaan.("**X**" för blödningsdagar med mensskydd, "**S**" för dagar med stänkblödning)

| Siddaad u dabageli laheed, wagtiga u ogaan laheed | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Bisha | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | 31 |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |

Kaarkaan ha ka soo tagin markaad la kulmeysid dhaqtarkaaga/umulisada.

Dhibaatooyin kale oo aad iyo aad u dhif ah waa: dareenka haweeysiga ragga oo kaa yaraada, timaha korka oo aad u baxa, dhidid, timaha madaxa oo kaa daata iyo timaha madaxa oo duffun jeesho.

Waxaa laga yaaba in eey u keento in buro ka soo baxdo tubooyinka ilmagaleenka. Burooyinkaas waxaa u caadi ah in eey babaan marki muddo la joogo.

La xiriir Xaruurta Dummarka ilma iskaceliska lagala taliyo:

- haddii aad cudurro kale aad qabtid.
- haddii aad dareemeysid in eey Mirena si fiican kuugu jirin.
- haddii aad shaki ka qabtid in uur aad leedahay.
- haddii bogxanuun aan kala istaageen ku hayo, qandho, dhacaan qeyru caadi ah hoosta kaa socdo, madaxa ku xanuunayo sidii goonjab ama aad iyo aad kuu xanuunaayo, dhiiggaada aad u karo iyo cagaarshoow (joonis).
- haddii sidii caadada kuugu dhici jirtey eey wax iska badalaan haddana, isbadalkaas oo ah dhiig badan baa islamarkii kaa soo daadanaayo haddana, mudda dheer kaa soconaayo, ama caadada xanuun badan kuugu qabato, ama eey caadada kaa guurto.

**Gobogobo**

Waxaa laguugula talinaaya in aad suufka dhiigga ee fidsan aad isticmaashid. Haddii aad isticmaashid nooca kale ee dhudhubaan oo sida farta u sameeysan, si taxaddir leh iskaga soo bixi illeen waxaa dhici karta adigoon ogeyn si gaf ah inaad Mirena la soo jiidid suufkaas.

Si aad u hubsatid in eey Mirena kuugu jirto waxaad sameyn kartaa farta ayaad ”gudaha” iska gelineeysa markaas waxeey fartaada soo taabaneeysa minka afkiisa iyo dummanka Mirena ku xiran.

Haddii aad duntaas dareemi weyso la xiriir Xarunta Dummarka si laguu baaro.

Mirena®, ilmo-galeenka la galiyo levonorgestrel 20 µg/24 saacadood
**Calaamada**: Kahortagga uurka. Dhiig baxa bilaa sababta. Kaa ilaalinaaya endometriehyperplasi inta lagu gudo jiro beddelka daaweynta hormoonka estrogen. **Waxyeelooyinka ay keento:** Madax xanuunka, isbeddelka muudhka, finanka iyo khalkhalka caadada. Waxyeelooyinka ay keeento ayaa inta badan ah wax khafiif ah iyadoo baaba'aysa dhowr bilood marka la isticmaalo kadib. **Digniino/ka taxadirida:** Mirena waa in loo isticmaalo si taxadir leh ama laga saaro ka dib marka lala tashado khabiir takhasuska u leh haddii mid ka mid ah xaaladaha soo socda ay jirto ama ay dhacdo markii ugu horreysay: madax xanuun aad u xun, dhanjaf meel ku kooban oo leh aragti lumis aan sineyn, cagaarshow, dhiig-kar, maskaxdhiig ku furma ama wadne istaag. Haddii cudurka kansarka naasaha lagaa hello, waa in laga fikiro ka saarista Mirena. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo qiimaha, ka eeg www.fass.se SPC 2018-03-28

Taariikhda _____

Qofka aad la kulmeysid

_____

Taleefoonka _____

Markaad soo laabaneeysid

_____

_____

_____

_____

_____

_____

Kaarka soo qaado markasto oo lagu baarayo.

Mirena®
levonorgestrel 20 µg/24 tim